



## Daryeelka Xannaanada Caruurta

Guddoomiyaha Gobolka Oregon Kate Brown, qeyb ka mid ah wareegti [Sharci 20-12](#), ee ay soo saartay intii lagu gudojiray dhibaatooyinka waqtigani ee xanuunka coronavirus , shaqaalaha lagama maarmaanka ahi waa in mudnaanta la siiyan addeegyada xannaanada caruurta. Shaqaalahaasi waxaa ka mid ah ciidamada booliska ee nabadgelyada/dab-damiska, shaqaalaha hawlaho degdega ah, xirfadalaasha daryeelka caafimaadka, shaqaalaha hawlgalada culus iyo shaqaalaha muhiim ah, iyo dadka ka shaqeeya meel degaanka ay degan yihin.

Haddaba si aad u hesho cid kugu soo xirirsa barnaamijka daryeelka caruurta degdega ah, waxaad la xiriirtaa 211info adiga oo dooranaya :

**Ikhtiyaariga 1aad:** Waxaad wacdaa 211

- Guji lambar 1 haddii aad rabto luqada Ingiriiska, 2 luqada Isbaanishka, waxaad gujisaa # dhammaan wixii luqadaha kale ah
- Waxaad gelisaa 5 god ee cinwaanka zip code
- Waxaad gujisaa 3 haddii aad u baahan tahay daryeelka caruurta
- Waxaad gujisaa 2 haddii aad rabto inaad la xirierto qof siiya qoyskaaga daryeelka caruurta.

**Ikhtiyaariga 2aad:** Waxaad fariinta degdega(Texting) ku qortaa ereyga muhiimka ah ee "caruur" ama "ilmo "ku dir lambarkani 898211 (TXT211).

**Ikhtiyaariga 3aad:** Adigoo Email u diraya [caruur@211info.org](mailto:caruur@211info.org).

211 SAACADAHA: Isnii ilaa Jimcaha: 7 subaxnimo. ilaa 11 habeenimo.; Sabti ilaa Axad: 8 subaxnimo ilaa 8 habeenimo.

### SIDOO KALE

Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo KinderCare waxa ay bixinayaan daryeelka caruurta ardayda gaadhay da'da iskuulka ee fasalada K-6.

- Daryeelka waxa laga bixin doonaa isaga oo la soo marinayo [Champions](#), oo ah qeyb takhakhus gaar ah u leh KinderCare ka hor iyo ka dib barnaamijyada iskuulada.
- Addeegani waxaa laga heli doonaa **Dugsiga Hoose ee Rieke**, oo ku yaala cinwaankani 1405 SW Vermont Street ee Portland. Waalidku iyaga ayaa ka mas'uul ah in ay caruurtooda soo raadsadaan sidoo kalena ka soo qaataan iskuulka.
- Waxaad la xiriirtaa Champions haddii aad u baahan tahay macluumaa dheeraad oo ku saabsan saacadaha daryeelka, cuntada, qiimaha daryeelka iyo kabista lagu sameynayo dadka aan dhaqaale fiican lahayn, iyo jawiga caafimaadka qaba ee ay bixinayaan.
- Wixii su'aalo ah? Waxaad wacdaa telefoonka Gargaarka Qoyska Champions (Champion Family Support) ee 1.800.246.2154

Caruurta ay qaadanayaan waxa ay ku saleysan yihin in la siinayo sida loo kala soo horeeyo, iyaga oo mudnaanta la siinayo shaqaalaha muhiimka ee isdiiliwaangaliya halkani:

[Codsiga Daryeelka: Ikhtiyaariga Rieke](#).